# Xarunta teegeerada waalidiinta

## Talo-siin iyo hagid loogu talagalay waalidiinta iyo ehellada ilmaha da`dooda u dhaxayso 0–18 sano



Gudasashada waajibka waalidnimada waxay noqon kartaa wax aan sahlanayn, sidaas darteed waalidka wuxuu mararka qaarkood u baahan yahay in laga caawinno maaraynta caqabadaha u la kulmo. Xarunta teegeerada waalidiinta waxaa laga helaa talo-siin iyo hagid waalidnimada lagu maareeyo oo loogu talagalay waalidiinta carruurta da`dooda u dhaxayso 0–18 sano, waa fursad waalidka gooni ahaan loo siiyo ama isagoo koox ka tirsan.

Fiirogaar lama siiyo nooca qoyska sidaas darteed qoys kasta xarunta waa lagu soo dhoweeyaa. Maamulka xarunta wuxuu tixgeliya xajinta sirta xirfadda, macnaha wax xasuus-qor ah lama qori doono waana lacag la`aan taageerada. Arrin kasta waa nalaga soo xiriiri kartaan!

UMEÅ KOMMUN

# Xarunta teegeerada waalidiinta

Tusaalaha arrimaha laga caawinno karo waxaa kamid ah:

- xoojinta xiriirka aad ubadkaaga la leedahay
- sidii si fiican u fahmi lahayd hab-dhaqanka ubadkaaga
- sidii aad u maarayn lahayd qilaafka adiga iyo ubadkaaga ama ka dhaca walaalaha dhexdooda
- sidii aad u maarayn lahayd dareenadaada culus oo soo ifbixi karaan markii ay jiraan xaalado caqabado leh
- sidii aad u heli lahayd nidaam shaqaynayo
- haddii adiga iyo waalidka kale aad doonaysaan inaad yelataan aragtida waalidnimada ee midaysan
- xeelado lagu maareeyo diidmada dugsi-dhigashada ee ubadkaaga
- talo-siin iyo taageero markii kala tegista waalidiinta ay dhacdo, iyadoo mudnaanta koowaad baahida ilmaha la siin doono

## Sidee ayaa loogu dhaqaaqa?

Hamigeenna waxaa weeyaan in waalidiinta iyo ehellada kale, idin suurtagelinno sidii ugu dhaqsi badan oo taageero iyo hagid dartooda aad noola soo xiriiri lahaydeen. Waalidiinta waxaan u taageerna gooni ahaan ama iyagoo koox ka tirsan.

## Faahfaahinta xiriirka

Xarunta teegeerada waalidiinta waa waax ka tirsan Maamulka adeegyada bulshada ee Dowladda hoose ee Umeå. Hawlwadeneyada Xarunta teegeerada waalidiinta waa aqoonyahanada arrimaha bulshada oo gaar ahaan u tababarsan, oona khibrad dheer iyo aqoon u leh xaaladaha ilmaha iyo qoysaskooda waxayna taageero siiyaan qoysaska carruurta leh.

Haddii aad u baahan tahay warbixin faahfaahsan,
nalaga soo xiriir:
**Telefoon:** 090-16 61 50
**Email:** foraldrasupporten@umea.se

Waxaad kalo nalaga soo xiriiri kartaa adigoo isticmaala adeegyada farsamada digitaalka ku salaysan, warbixin faahfaahsan ka aqriso: www.umea.se/foraldrasupporten